



# 10 Steps to Starting a Childcare Business



STEP  
1

## Tallaabada 1-aad: Cilmi-baadhis iyo qorshayn

- Baadhis ku samaa suuqa adeeg-bixinta daryeelka carruurta ee gobalka Washington si aad u fahamto baahida iyo tartanka jira.
- Samee qorshe-hawleed qeexaya hadafkaaga, adeegyadaada, suuqa bartilmaameedka kuu ah, jaango'ynta qiimaha, iyo saadaalinta maaliyadda.



STEP  
2

## Tallaabada 2-aad: Shatiyeynta iyo Xeerrarka

- Adigu is-bar xeerrarka shati-bixinta daryeelka carruurta ee gobalka Washington ee ku daabacan bogga aaladda Websaytka ee Waaxda Carruurta, Dhaliyarada iyo Qoysaska (WCDQ/ DCYF).
- hubso in aad raacdo sharciyada soohdinta iyo xeerrarka dhismaha xaruntaada.
- Kasbo sidaad ku heli lahayd shartiyada iyo oggolaanshaha aad ku bixin karto adeega daryeelka carruurta ee deegaankaaga (tusaale ahaan helitaanka shahaadada hurdo wanaaga, gargaarka deg degga ee CPR, kuwa maareeya nadaafadda cuntada, iwm).
  - \*\* La xidhiidh Ururka Adeeg-bixiyeyaasha Daryeelka Carruurta Soomaaliyeed UADCS/SCPA si lagaaga caawiyo geedi socodka oggolaanshaha iyo shatiyada lagama maarmaanka ah!



STEP  
3

## Tallaabada 3-aad: Goobta iyo Xarunta

- U samee xaruntaada si waafaqsan shuruudaha shati-bixinta, sida lahaanshaha meel bannaan oo ku filan, tallaabooyinka ammaanka goobta, iyo qalabka da' ahaan ku haboon.



STEP  
4

## Tallaabada 4-aad: Shaqaalaysiinta

- Shaqaaleysii xubno aqoon u leh oo buuxin kara shuruudaha shati-bixinta gobalka ee adeeg-bixiyeyaasha daryeelka carruurta.
- Samee baaritaan lagu hubinayo dambiyada isla-markaana xaqiijinaya in xubnaha shaqaaluhu ay leeyihiin tababarka CPR, gargaarka deg-degga ah, iyo xirfaddaha daryeelka carruurta.



STEP  
5

## Tallaabada 5-aad: Manhajka iyo Barnaamijyada

- Samee qorshe manhaj ama barnaamij la saan-qaadaya heerrarka wax-barrashada gobalka isla-markaana kobcinaya wax-barrashada carruurta iyo horumarkooda.
- Tixgelin-sii in aad bixiso barnaamijyo khaas ah ama wax-qabadyo ay xaruntaada daryeelka carruurta kaga duwan tahay, xarumaha kale.



STEP  
6

## Tallaabada 6-aad: Caafimaadka iyo Badqabka

- Hirgeli hab-raacyada iyo khiddadaha caafimaadka iyo badqabka, sida dhawrida nadaafadda, maareynta cudurrada, iyo hab-raacyada xaaladaha deg-degga.
- hubso in aad raacayso xeerrarka gobalka ee ku aadan tallaalada, baaritaannada caafimaadka, iyo shuruudaha soo gudbinta war-bixinta.



STEP  
7

## Tallaabada 7-aad: Caymiska

- Raadso damaanad caymis si ay u ilaaliso mehradaada haddii uu ku dhaco shil ama wax-yeelooyin kale oo aan muuqan.
- Qorshaha ku darso caymis dheeraad ah oo kaa daboola wax-yeelada soo-gaadha hantida, mag-dhawga shaqaalaha, iyo hakad-yada soo wajaha mehradda.



STEP  
8

## Tallaabada 8-aad: Maal-gelinta iyo Miisaaniyad-samaynta

- Xisaabi kharashyada ku baxay billaabidda mehrada, sida kharashaadka dhismaha xarunta, aggabyada, shaqaalaha, iyo lacagta helidda shatiga.
- samee miisaaniyad iyo qorshe maaliyadeed lagu maareeyo kharashyada baxaya, iyo waliba xaqiijinta faa'ido la helo.
- Sahmi fursadaha maal-gelinta sida deyn qaadashada ama helidda deeq lacageed.



STEP  
9

## Tallaabada 9-aad: Suuq-geynta iyo xayeysiinta

- Samee khiddad suuq-geyn ah si aad u soo jiidato macaamiisha doonaya adeegyada daryeelka carruurta.
- Isticmaal aaladaha internetka iyo kuwa war-baahinta kale sida barraha bulshada (social media), bogga websitka, fariin siddaha gaaban (flyers), aalada farrin xambaarka (apps), iyo kulannada kale ee bulshada si ay u gaadhaan macaamiil badan.
- Xusuusnow dhinacyada suuq-geyntaada gaarka ah iyo faa'idooyinka aad ka helayso adeegyadaada daryeelka carruurta.



STEP  
10

## Tallaabada 10-aad: Bilaabidda iyo Hawl-fulinta

- Si rasmi ah u bilow shaqada mehraddaada daryeelka carruurta marka aad samayso dhammaan diyaar-garowgaha loo baahan yahay oo dhan.
- Si joogto ah ula soco, oo u qancimee hawl-gallada, si loo hubiyo daryeel tayo leh, qiimee macaamiisha, iyo sharci u hoggaansanaan joogta ah.
- Si joogta ah ula soco taariikhda shahaadooyinka iyo xeerrarka sannadlaha ah ee dhacaya.